IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho 29 Nofember 1982, 1 R 11

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 39 ee 13 Sebt. 1982, U rogid Sharci, Xeer Sharci Damb. 4 ee 11.8.82 kuna saabsan Dhoofinta Badeeco lagu soo beddelo karo badeeco kale BOG. 1017

### QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER WASAARADDA M. & BIYAHA L. 19 ee 13.Abr. 81, Sicirka Biyaha lagu Iibinayo. » 1020

XEER WASAARADDA MALIYADDA L. 20 ee 12 Agoos. 82, Dhaqan gelid Lacagta 100-iyo 20ah.— » 1021

XEER WASAARADDA B. IYO ISGAR. L.21 ee 1 Okt. 1982, Qiimaha Dulsaarka Kaydka Boostada.— » 1023

XEER WASAARADDA DH. iyo ISBOORTIGA L. 22 ee 20 Abr. 82, Toosinta, Adkeynta Anshaxa & Asluubta Isboortiga.— » 1033

XEER WASAARADDA B. IYO ISGAAR SIINTA L. 23 Sebt. 82, Dhisidda Kabiilooyinka lagu xoojinayo Laymanka Telefoon.— » 1034

QAYBTA SADDEXAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER, 20.7.82, Lumid J g L. Y, 260133 ku qoran Yuusuf Caateeye Muuse L. 534 » 1035

MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN, 6.11.82, Lumid Buug Keyd L. 22668 ku qoran Xasan Daahir Cali L. 535 » 1036

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 20.11.82, Lumid Jeeg War. L. 358910 ku qoran Cabdi Axmed Ducaale L. 536 » 1037

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21.11.82, Lumid Jeeg War. L. 447916 ku qoran Saciid Cabdalla Maxamed L. 537 » 1038

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21.11.82, Lumid Jeeg War. L. 447415, ku qoran Saciid Cabdalla Max/d L. 538 » 1039

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21,11,82, Lumid Jeeg War. L. 462585 ku qoran Furdadda Xamar L. 539 » 1040

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG, 10.11.82, Lumid Jeeg War. L. 276200 ku qoran Xirsiyo Ciise Cigaal L. 540 » 1041

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.11.82, Lumid Jeeg War. L. 215525 ku qoran Siraad Xaaji Maxamed L. 541 » 1042

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

Sharci Lambar 39 taariikh 13 Sebt. 1982 U rogid Sharci, Xeer Sharci Lambar 4 ee 11.8.1982, kuna saabsan Dhoo finta badeeco lagu soo beddelo karo badeeco kale.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeerka Sharci Lambar 4 ee 11.8.1982, iyadoo wax laga beddelay Qodobbada 3aad iyo 5aad oo u qormaya sida soo socota:

Qod. 3aad

Badeecadaha ku tilmaaman qod. 1aad, Faqradda 3aad ee Xeer Sharcigan, waxay Dalka ku soo gelayaan Sicirka Caalamiga ah ee Badeecadda, Dadweynaha waxaa looga Iibinayaa Sicirka marba ay u goyso Wasaaradda Ganacsigu, oo la soo saaro Lixdii Biloodba mar, iyo markasta oo xaaladuhu kallifto.

Qod. 5aad

1. Ganacsadaha loo fasaxo dibad u dhoofinta badeecadaha ku tilmaaman Qod. 1aad ee Xeer Sharcigan, wuxuu dhigayaa curaar damaanad ah oo gaareysa 30% qiimaha dhoofka Badeecadda.
2. Qiimaha dhoofka Badeecadda waxay Wasaaraddu soo saari doontaa Saddexdii Biloodba mar.
3. Haddii uu Dalka ku soo celin waayo qiimaha Badee cadda uu dhoofiyey waqtigii loo qabtay gudihiisa, Curaarta waxaa la wareegeysa Wasaaradda Maaliyadda.
4. La Wareegidda Curaarta kama reebeyso dhoofiyaha ciqaabta ku tilmaaman qod. 10aad ee Xeer Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J. D. Soomaaliya.

Muqdisho, 13 Set. 1982

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA MACDINTA IYO BIYAHA L. 19
13 Abriile 1982 Sicirka Biyaha lagu Iibinayo·

WASIIRKA

MARKUU ARKAY: Sharciga Maamulka iyo Lacagta ee J· D S. ee L. 2 29.12·61

MARKUU ARKAY: Sharciga lagu dhisay Wakaaladda H. Biyaha Lr· 28 ee 20,2,71, Wakaaladda Biyaha Xa mar Lr. 18 ee 6·4,78, Wakaalada Biyaha Hargeysa Lr· 29 ee 29,7,78 iyo Wakaaladda Biyaha Kismaayo Lr. 30 ee 29·7,78,

MARKUU DERSAY: Inay habboontahay in dib loogu noqdo Ascaarta Biyaha lana ogaaday inaan qiima ha Biyaha lagu soo saaro iyo Kharajka ku baxa isdabooli karin Miisaaniyadda Dawladdana aan dhammaan laga kabin.

MARKUU DHEGEYSTAY: Warbixinta Maamulka Wa kaaladda Horumarinta Biyaha, Wakaaladda Biyaha Xamar, Wakaaladda Biyaha Hargeysa iyo tan Kis maayo, waxaa lagama maarmaan noqotay in sicir ka Biyaha horey loogu Iibin jiray wax laga bedde lo laguna Iibsho sicirka cusub ee Xeerkan ku qoran·

WUXUU XEERAY

Qod· 1aad

Waxaa la guddoonsaday in Biyaha Ceelasha ku yaal Gobolada J. D. S. iyo Magaalooyinka aan laha yn «Water System» oo ay Gacanta ku hayso Wakaa ladda Horumarinta Biyaha lagu Iibsho sicirka hoos ku qoran·

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Kun Litir (1m3) B. Mag/nka | Sh· So. | 4.50 |
| 2. | Fuusto (200 Litir) | Sh· So. | 0.90 |
| 3· | Neefka Geela ah | Sh. So. | 0.30 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4. | Neefka Lo'da ah iyo IWM | Sh. So. | 0.15 |
| 5. | Boqol Neef Ari ah | Sh. So. | 5.00 |
| 6. | Ratiga Dhaanka ah | Sh. So. | 0.50 |
| 7. | Tanaga Biyaha ah | Sh. So. | 0.10 |

Qod. 2aad

Magaalooyinka leh «Water System» waxaa lagu Iibinayaa kun Litir (1m3) Biyo ah. 4.50

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa 1 May 1981

Qod. 4aad

Waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 13 Abr. 1981

Dr. Xuseen Cabdulqaadir Qaasim
WASIIRKA MACDANTA IYO BIYAHA

XEER WASAARADDA MAALIYADDA.. 20 ee 12 Ago. 1982, Dhaqan gelid Lacagta 100— iyo 20 ah.—

WASIIRKA

MARKUU ARKAY: Qodobka 4 ee Xeerka 6da Maarso 1961 oo loo bedelay Sharciga 23ka Maarso 1961 Lr. 13 kuna saabsan nidaamka Lacagta Soo/yeed.

MARKUU ARKAY: Qodobka 4 ee Sharciga 5ta Juunyo 1962, Lr. 2 kuna saabsan nidaamka sameynta, soo saaridda iyo wareeggeynta Xaashida iyo tan cada diga oo Shilin Soomaaliga.

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha J. D. S. Lr. 66 ee 9kii Disambar 1981

ASAGOO TIXGELI: In Lacagta Kaydka ee 100 iyo 20 Shilin ay aad u hooseyso.

ASAGOO GARTAY: Baahida loo qabo in la gooyo taa riikhda ay dhaqan galeyso Lacagtaasi, Ayada, uu soo Jeediyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

Qod. 1aad

Xeerka Qodob keliya: Lacagta Xaashida Cusub ee 100 iyo 20 Shilin Soomaali oo tilmaamaheeda iyo su madaheeda farsamo lagu carrifay Xeerka Madaxwey naha J. D. S. Lr. 66 ee 9kii Disembar, 1981. waxay ka dhaqan galeysaa, kana soconeysaa Dhulka J. D. ee S. oo dhan laga bilaabo 1.9.1982.

Xeerkani wuxuu Bankiga Dhexe ee Soomaaliya u oggolaanayaa inuu Lacagta uu wareeg geliyo laga bi laabo taariikhda 1da Sebtambar 1982

Muqdisho, 12.8.1982

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

Dr. Cabdulaahi Axmed Caddow

XEER WASAARADDA B· IYO ISGAARSIINTA L. 21
Qiimaha Dulsaarka Kaydka Boostada·—

WASAARADDA BOOSTADA & ISGAARSIINTA

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Nidaamka Dawladda iyo Qaabka Dhismaha Dawladda Xeerkii u degsanaa Bankiyada ee soo baxay 14 Agosto 1963 Lam. 18 laguna dhaqayo Kaydka Boostada.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 6aad ee Sharciga Lambar kiisu yahay 17 soona baxay 21ka Jennaayo 1975 ku na saabsan Kaydka Boostada,

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maar maan in la kordhiyo Qiimaha Dulsaarka Kaydka Boostada, iyadoo la waafajinayo Qiimaha Dulsaar ka ay bixinayaan Bankiyada Waddanka gudihiisa ka furan yihiin·

ISAGOO TIXGELIYEY: Wada tashiga uu la yeeshay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda·

WUXUU XEERAYAA

Qod· 1aad

Qiimaha Dulsaarka

Laga bilaabo 1da Oktoobar 1982, Qiimaha Dulsaar ka dhigista Caadiga ah ee Kaydka Boostada, waxaa la ga dhigay 8% Boqolkiiba Sideed Shilin Sannadkiiba, la ga bilaabo 1da Jennaayo ilaa 31ka Dishember.

Qod. 2aad

T i r t i r i d

Xeerkani wuxuu tirtirayaa Xeerkii ka horeeyey oo ku saabsan Dulsaarkii lagu bixin jiray 2% (Boqolkiiba laba Shilin).

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 1 Oktoobar 1982, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

WASIIRKA MAALIYADDA

(Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA B. I

(Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad)

Xeer Wasaaradda Dhalinyarada & Isboortiga L. 22 ee 20.4.1982, Toosinta, Adkeynta Anshaxa & Asluubta Ispoortiga.

WASIIRKA

Wasiirka Wasaaradda Dhalin. & Ispoortiga

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya L.3aad

MARKUU ARKAY: Qod. 5aad ee Dastuurka J. D. S.

ìMARKUU ARKAY: Sharciga L. 3 15 Desember 1976ki Qodobkiisa 17aad.

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo toosinta Adkeynta Anshaxa & Asluubta Ispoortiga Dalka.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA

QAYBTA 1AAD

Ka mid noqoshada Garsoorayaasha Ispoortiga ka la duwan ee Dalka J. D. Soomaaliya.

Qod. 1aad

Waxaa Garsoore Ispoorti loo qaadan karaa qof kastoo Soomaali ah oon da'diisu ka yarayn 25 Sanno kana weyneyn 30 Sanno, wuxuuna Garsooridda Ispoo rtiga ka fariisanayaa marka da'diisu gaarto 50 Sanno ama marka Lixaadkiisa wax ka dhinmaan, ama uu sa meeyo falal ka reebaya Garsoorka Cayaaraha.

Qod. 2aad

Qofka loo qaadanayo Garsoore Ciyaareed waa inuu ahaadaa qof Lixaadka Jirka iyo Maskaxdu u dhan yihiin, Caafimaadkiisuna wanaagsan yahay.

Qod. 3aad

Qofka loo qaadanayo Garsoore Ciyaareed waa inuu yahay qof aanay aqoontiisu ka hooseyn D/Dhex ama wax u dhigma.

Qod. 4aad

Qofka noqonaya Garsoore Ciyaareed waa inuu yahay qof aqoon u leh nooca Cayaarta uu doonayo inuu Garsoore ka noqdo uuna jecel yahay qaabkeeda na leeyahay.

Qod. 5aad

Qofka loo qaadanayo Garsoore Ciyaareed waa inuu yahay qof aan dembi ka Oolin Maxkamadaha Dalka amaba aan hora loogu aadin Ciqaab Anshexeed lagaga fariisiyey gebi ahaan Garsoorka Ispoortiga Dalka.

Qod. 6aad

Qofka noqonaaya Garsoore Ciyaareed hadduu hora Garsoore uga ahaa nooc kale ee Cayaareed waa in uu caddeyn qoraal ah kaga tanasulaa tii hore ka dibna loo Diiwaan geliyaa midda cusub haddii uu la yimaado ama buuxiyo Shuruudaha laga doonayo.

Qod. 7aad

Qofka laba nooc Cayaareed ugu diwaan gashan Garsooranimo haddii uusan la imaan wax dhaliil ah ama uusan isagu caddeyn qoraal ah kaga tanasulin Garsooranimada labada Cayaarood mid ka mid ah waa loo ogol yahay in uu isku wado Garsoorka labadaas nooc Cayaareed.

Qod. 8aad

Garsooraha u Diiwaan gashan in uu ka Garsooro laba noocCayaareed haddii fulinta labada Sharci ee la

gu maamulo labadaas Cayaarood ay isaga darsamaan amaba fulintooda lagu dhaliilo, Xiriirku wuxuu awood u leeyahay in uu ka joojiyo Garsooranimada nooca Ca yaarta lagu dhaliilay.

Qod. 9aad

Lama ogola in laba nooc Cayaareed wax ka badan qof Garsoore ka noqdo.

Qod. 10aad

Qofka Garsooraha noqonaya waa in uu barto xusuua fiicana u yeesho qawaaniinta nooca Cayaarta uu ka Garsoorayo, isaga oo soo maraya Tababar Farsamo ka dibna maraya Imtixaan uu kaga gudbo dhibco aan ka yareyn boqolkiiba 60/ si loogu aqoonsado Garsoore heerka 3aad (ARBITO DI 3o GARADO).

Qod. 11aad

Heerarka Garsoorayaasha Cayaaraha kala duwan waxay u kala baxaan afarta heer oo kala ah:

1. Garsoore Caalami ah (INTERNAZIONALE)
2. Garsoore Heerka 1aad (NATIONALE)
3. Garsoore Heerka 2aad
4. Garsoore Heerka 3aad.

Qod. 12aad

(A) Waxaa Garsoore Caalami ah noqon kara qofkii isagoo heerka 1aad ah hela aqoonsiyada Caalamiga ah ee Garsoorenimo taasoo ku imaaneysa qiimeynta & Aqoonsiga Xiriirka uu ka tirsan yahay oo la tashaday Guddiga Olimbikada Qaranka, isla markaa na loo cuskanayo qawaaniinta Ururada Caalamiga ah.—

(B) Xiriirku wuxuu awood u leeyahay inuu Garsoorihii muujiya Karti iyo Aqoon uu u gudbiyo heerka

uu joogo kan ku xiga, isagoo aan waqti iyo shuruud kale toona lagu xirin, waana marka Garsooruhu buuxiyo shuruudaha laga doonayo u gudbidda heerka u tegayo.

(C) Garsooraha heerka 3aad wuxuu heerka 2aad u gudbi karaa marka uu Garsoore ka noqdo ugu yaraan Labaatan (20) Cayaarood oo heerka 3aad ah, ama sida ku xusan Xarafka (b) ee isla qodobkan.

(D) Garsooraha heerka 2aad wuxuu heerka 1aad u gudbi karaa marka uu Garsoore ka noqdo Labaatan & Shan (25) Cayaarood oo heerka 2aad ah, ama sida ku xusan Xarafka (b) ee isla qodobkan.

(E) Xiriirku wuxuu awood u leeyahay inuu Sanad walba LiiskaGarsoorayaasha Caalamiga ah iyo kuwa heerarka kaleba dib u raaco kana saaro Garsoorayaal hora ugu jirey kuna daro kuwa cusub, iyadoo la qaymeynayo wax qabadka Garsoorawalba amaan iyo Dhaliil.

(F) Xiriirku wuxuu awood u leeyahay inuu Garsoorihii ka soo bixi waaya Xilkiisa ama ay ku cadaato inuusan u qalmin heerka uu joogo, amaba dhowriwaaya Shuruucda Isboortiga lagu maamulo in uu ka qaado talaabooyinka hoos ku qoran:—

1. In laga joojiyo Safar uu Debedda u aadi lahaa
2. In la siiyo Canaan qoraal ah
3. In la siiyo Degniin qoraal ah
4. In Garsooranimada laga fariisiyo in muddo ah
5. In heerka uu joogo kan ka hooseeya loo celiyo
6. In Liiska Garsoorayaasha laga saaro, Aqoonsiga Garsooranimana laga qaado.

(G) Garsooraha marka Ciqaabahaas mid ka mid ah la marinayo waa in la hor keenaa Guddi Anshax laguna cadeeyo Dembiyada lagu Ciqaabayo.

(H) Garsooraha ku qanci waaya Go'aanka Guddiga Anshaxa ee Xiriirku u magacaabo waxaa u banaan in uu rafcaan u qaato Guddiga Olimbikada Qaranka muddo 15 Casho gudohood ah laga bilaabo marka u helo Go'aanka Guddiga Anshaxa.

Qod. 2aad

(WAAJIBAADKA GARSOORAHA)

Qod. 13aad

Garscoruhu marka uu gelayo Garconka waxaa laga doonayaa in uu u dhan yahay Qalabka Garsooridda.

Qod. 14aad

Carsooraha Caalamiga ah wuxuu ka Garsoori karaa (CALAN HAYAHA KA NOQON KARAA)

1. Cayaaraha Caalamiga ah
2. Cayaaraha heerka 1aad
3. Haddii loo baahdana Cayaaraha heerarka hoose

(2) Garsooraha heerka 1aad, wuxuu ka Garsoorka karaa (CALAN HAYANA KA NOQON KARAA)

1. Cayaaraha heerka 1aad
2. Cayaaraha Saaxiibtinimada ee Caalamiga ah
3. Haddii loo baahdana Cayaaraha heerarka Hoose

(3) Garsooraha heerka 2aad, wuxuu ka Garsoorka karaa.

1. Cayaaraha heerka 2aad
2. Cayaaraha Tijaabada ah ee heerka 1aad
3. Cayaaraha Gobollada & kuwa Dugiiyada
4. Cayaaraha Jaamacadaha & Ciidamada
5. Wuxuuna Calan haye Labaad ka noqon karaa Cayaaraha heerka 1aad.

(4) Garsooraha heerka 3aad wuxuu Garsoore ka noqon karaa:

1. Cayaaraha heerka 3aad
2. Cayaaraha Dugsiyada
3. Cayaaraha Degmooyinka
4. Cayaaraha Ururada Ubaxa Kacaanka.

Qod. 15aad

Garooruhu wuxuu awood Sharci u leeyahay.

(A) In uu ka Garsooro Ciyaar kasta oo si rasmi ah loogu magacaabo bilowgeeda ilaa dhamaad keeda. Isaga oo ka kaashanayo Labada Calanhaye ama Garsooraha 2aad.

(B) In uu Garoonka ka saaro ciddii wax u dhimeysa habsami u hoggaaminta Cayaarta.

(T) In uu u yeerto Ciidamada Nabad gelyada had duu uga maarmi waayo adkeynta Nabad gelyada Garoonka.

Qod. 16aad

Garsooraha waxaa ka reeban:

1. In uu faafiyo isagoo ka ceeb sheegaya Go'aamada ka soo fulla Xiriirada iyo Hay'adaha kale ee Ispoortiga Maamulka.
2. In uu si aan haboonayn u fasiro tallaabo uu qaaday Garsoore kale oo ku saabsan Cayaartoow ama ruux kale oo Cayaartu khuseyso.
3. In uu galo maamul Ispoortiga (NAADI, GOBOL, DEGMO AMA MEEL KALEBA).
4. In uu ka maqnaado Ciyaar rasmi ahaan loogu magacaabay ama isku bedelo Garsoore kale ama Calan haye, isagoo aan ogolaansho ka helin Xiriirka soo magacaabay.

5. In uu ka ceeb sheego Garsoore kale oo gudanaya Xilkiisa Garsoorenimo.

6. Waa in Garsooraha ayaan marna ka muuqan nebcasho ama jecayl kooxeed ama Naadiyeed.

7. Waa in uusan cudur daar la'aan ka maqnaan layli, Tababar, shir hawleed oo rasmi ahaan loogu yeeray

8. Haddii Garsooraha lagu cadeyo todobadaas fal ee kor ku qoran mid ka mid ah waxaa loo cuskanayaa Xarfaha (F) ee qodobka 11aad ee Xeerkaan.

## QAYBTA 3AAD

## (XUQUUQDA GARSOORAHA)

### Qod. 17aad

Garsooruhu si uu xilkiisa Garsoorenimo u guto wuxuu xaq u leeyahay.

1. Garsooruhu marka uu Garoonka ku jiro wuxuu gudanayaa xil Qaran ciddii dhib u geystana waxaa la horgeynayaa Maxkamadda ku shaqa leh dhibka loo geystay ama dembiga laga galay.

2. Wuxuu xaq u leeyahay hal joog oo Dharka Garsooreyaasha ah Labadii Sanoba hal mar.

3. Wuxuu xaq u leeyahay hal Firimbi Labadii Sanaba.

4. Wuxuu xaq u leeyahay hal joog oo kaba Ispoorti ah Labadii Sanaba hal mar.

5. Wuxuu xaq u leeyahay Laba joog oo Kaalsa ah Labadii Sanaba hal mar.

6. Wuxuu xaq u leeyahay Baaris Caafimaad oo Dalka gudihiisa ah Labadii Sanaba hal mar.

7. Wuxuu xaq u leeyahay xaq siin markay dhibi ka soo gaarto gudashada xilkiisa Garsoorenimo.

8. Wuxuu xaq u leeyahay Gunno Garsoore marka uu Cayaar Rasmi ah oo xiriirkiisu u magacaabay qab to taas oo lagu cadeyn doono Amar gaar ah oo heer Wasiir ah.

9. Wuxuu xaq u leeyahay in la dhowro Nabad gelya diisa inta uu xilka Garsoorenimada gudanayo waa na inta u dhexeysa waqtiga Cayaarta la bilaabo ilaa ay ka dhamaato.

10. Ciddii Garsooraha wax ku gaarsiisa arrin la xiriirta Cayaar dhex dhexaadiyey waxay la mid tahay iya doo wax lagu yeelay isaga oo gudanaya xilkiisa Garsoorenimo.

11. Go'aanka Garsooruhu gaaro marka uu Cayaarta ka Garsoorayo waa kama dambeys hadii uusan jebin qodob ka mid ah Sharciyada u degsan maamulka Cayaarta uu dhex dhexaadinayo.

12. Haddii ay cadaato in Garsooruhu jebiyey qodob ka mid ah Xeerka Cayaarta uu ka garsoorayo u degsan, Guddi gaar loogu magacaabo ayaa gelaya Dacwa da laga soo Oogey Go'aanka ka gaaraya.

QAYBTA 4AAD

(MUDNAANTA GARSOORAHA)

Qod. 18aad

Xiriirku marka uu Garsoore cusub ku qorayo Lii ska Garsooreyaasha Caalamiga ah wuxuu awood u leeyahay in uu ku doorto Garsooraha cusub: Kartidii sa, Aqoontiisa Farsamo, Kacaanimadiisa iyo Wadani nimadiisa.

Qod. 19aad

Haddii Laba Garsoore isaga mid noqdaan shuruu daha kor ku xusan Xiriirku wuxuu tixgelin gaar ah siinayaa Ninka ku fiican Luqadaha Shisheeye haddii ayaan jirin sababa kale oo lagaga reebi karo.

Qod. 20aad

Marka uu jiro Tababar Garsoorenimo ee Debadda loo aadayo waxaa soo jeedinaya Guddiga Garsooreyaa sha waxaana ogolaanaya Xiriirka oo la tashaday Gud diga Olibikada Qaranka.

Qod· 21aad

Xiriirka ama Guddiga Olimbikada Garsoore waa u magacaabi karaan Tababar Debadda haddii loo arko in uu mudan yahay·

Qod. 22aad

Xiriir kastaa waa in uu sameyaa Tababar Garsoo renimo ugu yaraan hal mar Sanadkiiba si loo soo saaro Gar soorayaal xag aqooneed iyo xag Farsamoba ka dhisan.

QAYBTA 5AAD

(GUDDIYADA GARSOOREYAASHA)

Qod. 23aad

Garsooreyaashu waxay Labadii Sanaba hal mar iska dooranayaan «GUDDI GARSOORE» oo u xil saaran Maamulka Arrimaha Garsooreyaasha, wuxuuna ka koo ban doonaan:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Guddoomiye. | Hal |
| 2. | G/KU Xigeen· | Hal |
| 3· | Xoghaye. | Hal |
| 4. | Xubno. | Labo. |

Qod. 24aad

Guddiga Garsoorayaashu marka uu magacaabay Garsoore Cayaareed gaar ahaan Cayaaraha Culus wu xuu la tashaaya Xiriirka uu Hoos yimaado.

Qod. 25aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Maamulka Garsoo rayaasha waxaa lagu caddeyn doonaa Xeer nidaamiya gaar ah oo Xeerkan la socon doona·

Qod. 25aad

Guddiga Maamulka Garsoorayaasha waxaa ka mid noqon kara Garsoorayaasha Caalamiga ah & kuwa hee rka 1aad & Garsoorihii loo arko in uu xilkaas fulin karo·

Qod. 26aad

Garsooraha xubinta ka noqonaya Guddiga Garsoorayaasha waa in uu yahay Garsoore ladda haya hawsha Garsooranimada.

Qod. 27aad

Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Daladda J. D. Soomaaliyeed.

Qod. 28aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo Taariikhda uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Dhalinyarada & Ispoortiga.

Muqdisho, 20 Abriil 1982ka.

G/Sare Mire Awaare Jaamac
WASIIRKA W/DH & ISBORTIGA

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIIN TA L. 23 ee 12 Sebt. 1982 Dhisidda Kabiinooyinka lagu Xoojiyo Laymanka Telefoon.—

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 12aad ee Sharciga Isgaar siinta tirsigiisuna yahay 1 soona baxay 22.12.1975:

ISAGOO TIXGELINAYA: Bilicsamada Magaala ma daxda J. D. Soomaaliya.

ISAGOO TIXGELINAYA: Baahida weyn ee loo qabo oo ay lagama maarmaan tahay in la dhiso Kabii nooyin (Cabins) lagu xoojiyo laymanka Telefoonka.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Dhismaha Kabiinooyinka

Si looga baxo dhibaatada ismaqal xumida iyo cirii riga loogu jiro Telefoonada Magaalada Xamar, gaar ahaan Waddada Maka almukarrama iyo hareeraheeda oo Lambarada Telefoonada ka bilaabmayaan Lr.8, wa xaan u jideeyey in waaxda Telefoonka ay ku dhisto Ka biinooyinka loo baahanyahay.

Qod. 2aad

Qaabka Kabiinooyinka

Kabiinooyinka qodobka sare ku xusan weynankoo da waxaa lagu qiyaasay Mt. 2x2.—

Qod. 3aad

Dhaqan gelin

Xeerkan hore ayuu u dhaqan gelayaa, waxaana la gu soo saari doonta Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S.

Muqdisho, 12.9.1982

WASAARADDA BOOSTADA & ISGAARSIINTA
(J/le Dr. Cabdulaahi Cosoble Siyaad)

WASAARADDA BOOSTADA & ISGAARSIINTA

Minguurin Qodobada 12aad ee Sharciga Isgaarsiinta La mbarkiisu yahay 1 ee 22·12·1975.—

Qod. 10aad

Xuquuqsiinta marinka iyo Tiirinta

Celinta Aaladda Isgaarsiinta Waayeerrada ama Keebaalada, haddii aanay tiirar (Support) ku xirnayn waxa la dhex marin kara ama ka dul dhacaan Dhul dad ama Dawladda gaar ahaan u leedahay.

Waayeerrada ama Keebalada waa in la dhigaa mee la haboon si aaney isu hor taagin isticmaalka caadiga ah, ulajeeddadeedu tahay.

Wixii aan taas ahayn, gudbinta iyo tiirinta waa yeerrada, Keebalada iyo gelintooda Dhulka dushiisa, Hoostiisa amase meel ya soo deldelain, waxa loo baahan yahay in loo helo oggolaansho qofka leh, laakiin, siin ta waxa markaas lagu jideeyn doonaa amar Xeer ka soo baxay Xoghayaha Boostada iyo Isgaarsiinta.

Qod. Art. 12aad

Servitu di passaggio e di appoggio

Nell'impianto di telecomunicazioni i fili o cavi se nza appooggio possono passare attraverso le proprieta pubbliche o private·

I fili o cavi devono essere collocati in modo da non impedire il libero uso della cosa secondo la destinazi one·

In ogni altro caso, per il passaggio e lappoggio dei fili, cavi ed impianti sul suolo, nel sottosuolo o sulla area soprastante e necessario il consenso del proprie tario; ma la servitu pud sempre essere imposta alle proprieta pubbliche e private con decreto del segreta rio di Stato per le poste e Telecomunicazioni.

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJEEDDO, KA SOO SAARIN FAAFIN TOG. L. Y. 2601336

Guddoomiyuhu Markuu arkay: Dacwada L.Y. 85-82 ce u ku sheeganayo, Jaalle Yuuslf Caateeye Muu se in uu qaatay Bankiga Ganacsiga Laanta Burco uu codsadayna in la siiyo Jeegga Lumay.

MARKUU ARKAY: Baafinta Bankiga taariikh 31.5.82

MARKUU ARKAY: Codsiga Bankiga Ganacsiga Laa nta Burco Taariikh 20.6.82 ee u codsanaayo Amarto in lumista Jeegaa lagu, soo saaro Faafinta Rasmi ga si loogu celiyo Lacagta Jeegaa Ninka lahaa.

MARKUU ARKAY: Qod. 69, D. L. DEL L 9.9.65,

WUXUU AMRAYAA

In lagu soo saaro Lumis Jeega L. Y, 260133 haddii cid kale sheegan waydo Jeegaa 30 Cisho dabadeed Faa finta ka dib Gacanta ha laga saaro Lacagta Jaalle Yuu suf Caateeye Muuse.

Burco, 20.7.82,

L. 534

SHAQO WACAN

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER

3:82 MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN B. WEYNE Maxkamaddu Markay Aragtay Arjiga uu soo Qortay Xasan Daahir Cali ee uu ku soo sheegay in uu ka Lu may Buuga Keydka Lacagta ee L. 22668 ee ay ku qoran tahay Sh. So· 40.966) markey aragtay Warqadda Cadda ynta Bankiga B. Weyne ee L·000639 T. 2.11:1982, soona sheegay Lacagtaasu in ay taal Bankigan.

SIDAAS DARTEED,

Markey Aragtay Arjigaas iyo Warqada Bankiga.

Markey Aragtay Qodobada 69 ee soo baxay 9·9.65 N:2.

Sidaas darteed waxay Caddeyneysaa

Lumidda Buuga Keydka Lacagta L. 22668 ee Sh· So. 40.966; uu ka lumay Jaalle Xasan Daahir Cali.

WAXAYNA AMREEYSAA

Ka dib markii la geliyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda Ninkaas in loo sameeyo Buuga lumay bedelkiisi muddo 15 maalmood gudohood, asagana Gacanta laga saaro.

B. WEYNE, 6·11.82

KAALIYAHA MAX· GH.

Cali Maxamed Maxamuud

GUDOOMIYAHA MAXK. G. HIIRAAN

Dr. Maxamed Xuseen Rooble

L. 535

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 358910 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 10.000 uu iska lahaa Jaalle Cabdi Axmed Ducaale sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 009633 taariikhdeedu 18.11.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam: 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 358910 oo ku qoran Jaalle Cabdi Axmed Ducaale ayna ku jirto Sh. So. 10.000.

WAXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco u bedelo J: W. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib akey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S. Haddii inta ka horeysan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.11.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 536

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 447916 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qo ran Lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Jaalle Saciid Cabdalle Maxamed sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 03017 taariikhdeedu 21.11.82 ee Ban kiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam: 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega Lam. 447916 oo ku qoran Jeegga Wareega ayna ku jirto Sh. So. 50.000.

WAXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo J. Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. Soomaaliya had dii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.11.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 537

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 447415 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Jaalle Saciid Cabdalle Maxamed sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 03017 taariikhdeedu 21.11.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta .

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam: 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega Lam. 447415 oo ku qoran Saciid Cabdalla Max. ayna ku jirto Sh. So. 50.000.

WAXUU FARAAYAA

In ankiga BGanacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo Jeega Wareega ee kor ku tilmaaman una samееyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.11.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 538

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 462585 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qo ran Lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Furdad da Xamar sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 009648 taariikhdeedu 20.11.82 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam: 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega Lam. 462585 oo ku qoran Furdadda Xamar. Ayna ku jirto Sh. So. 50.000.

WAXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xis. Guud u bedelo J. Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 21.11.82.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 539

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG GAALKACYA

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Keydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, oo Taarii khdeedu tahay 27.10.82, ayna ku Caddeeyeen in uu Lumay Jeegga Wareega L. 276200 ee la qoray 21.3.82, ayna ku qorayd Lacag dhan Sh. So. 13.500 (Seddex iyo Toban Kun iyo Shan Boqol) kuna qor raa magaca Xirsiyo Ciise Cigaal, hase yeeshee ka lumay Laanta Saadka ee Gaaska Siddeedaad X.D.S. ee Garoowe,

HADDUU ARKAY: Codsiga ka yimid Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo oo ku qoran Warqadda kor ku tilmaaman.

HADDUU ARKAY: Qod. 69aad ee D. L. 9.9.1965 N. 2

Waxa u caddaatay in uu lumay Jeega kor ku xusan wuxuuna Amarayaa in loo cusbooneysiiyo Jeeggaas Laanta Saadka ee Gaaska 8aad X. D. S. ee Garoowe, ka dib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlad da ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah.

Wuxuu Amrayaa oo kale in Jeegga cusub Gacanta laga saaro Taliyaha Laanta Saadka Gaaska 8aad ee Ga roowe, amase cid Wakaalad Sharci ah ka sidata ka dib markii muddadaas la sugo haddii aan cid kale la shee gan.

Gaalkacyo, 10.11.1982.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA

Sh. Cabdullaahi Hilowle

L. 540

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 215525 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad kuna qo ran Lacag dhan Sh· So· 16.900 uu iska lahaa Jaalle Siraad Xaaji Maxamed sida ku cad Warqadda Lam barkeedu 7136 taariikhdeedu 28.11.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9·9,65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Dhumay Lamb· 215525 oo ku qoran Siraad Xaaji ayna ku jirto Sh. So. 16·900.

WAXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hodon u bedelo J. Wareegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareen 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daaba co Faafinta Rasmiga ah ee J· D. S· Haddii inta ka horey sa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.11.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BENAADIR

W· S. Dr· Cabdulaahi Maxamed Maax